

Safarka

Warbixinta Safarka ee loogu tallogalay Safrayaasha North Dakota

FIIRO GAAR AH: Waa masuuliyada safraha inuu aqoonsado sharuudaha la xiriirto safarkooda, sida sharuudaha safarka (nooca baaritaanka loo baahanyahay [PCR ama Antijeenka Degdega ah], qaadista gaarka ah, dokumintiyada loo baahanyahay ee baaritaanka COVID-19, tallaalka, iwm.) ku kala duwanyihiin meeshauu ku socdo iyo qaadaha. Sidoo kale, hubi inaad la socotid waxa aad u baahantahay inaad soo celisid. Waaxda Caafimaadka North Dakota lama socoto dooqyda laga heli karo meeshaad usocotid si aad u buuxisid sharuudaha U.S., qaadaha, ama meeshaad usocotid ee kale.

Ma safreysaa dhawaan?

Miyaad hadeer ka safreysaa North Dakota?

Miyaad u safreysaa (ama ku soo laabanaysaa) North Dakota?

*Fadlan u ogolow illaa 72 saacadood si aad u heshid natiijooyinka baaritaanka ee Sheybaarka Gobolka North Dakota. Waqtiga wuxuu bilowdaa markii muunada timaado sheybaarka, ma ahan waqtiga qaadista. Natiijooyinka baaritaanka waxay aad ugu xirantahay goobta iyo wadooyinka qaadaha. Haddii lagaa baaray xarun baaritaan gaar ah, kala xiriir iyaga natiijooyinkaaga.

Ma safreysaa dhawaan?

NATIIJOOYINKA BAARITAANKA SAFARKA

Ma raadineysaa natiijooyinkaaga si markaas aad u safartid? Fadlan kaliya gudbi sahankaaga safarka haljeer. Codsiyada waxaa la kormeeraa maalin walba 8:00am - 9:00pm. Natiijooyinka waxaa la bixinayaa sida ugu dhaqsaha badan ee la heli karo iyaga.

Qadka Natiijada ee natiijooyinka baaritaanka Antijeenka Degdega ah waa 701-204-6664, la heli karo Isniinta-Sabtida laga bilaabo 8:00am illaa 5:00pm haddii shaqsi u baahanyahay natiijada BinaxNow ama koobiga natiijada ama u baahanyahay caawin kale.

Haddii aad ka safreysid North Dakota oo aad u baahantahay in lagaa baaro COVID-19, la xiriir meelaha baaritaanka bulshada, qeybta caafimaadka dowlad deegaanka ah, xarunta caafimaadka faderaalka u qalanto, ama farmashi bixiyaa baaritaanka ah. Goobta baaritaankaaga, fadlan u sheeg shaqaalaha inaad isaga baareysid ujeedo safar iyo nooca baaritaanka aad ugu baahantahay meeshaad u socotid. Sheegida inaad safraa tahay mudnaanta masiiso ama ma dadajiso natiijadaada; waxay noo ogolaataa inaan si fudud u dabagalno muunadaada si aan kuu siino natiijadaada sida ugu dhaqsaha badan ee la heli karo.

GOOBAHA BAARITAANKA GOBOLKA KA BAXSAN

Riix halkaan oo liiska goobaha baaritaanka, adiga oo xasuusan in badel macquul ee baahiyada baaritaankaaga aanan qorneyn. Marwalba la xaqiiji sharuudaha duulimaadkaaga iyo meeshaad u socotid.

Haddii aad u baahantahay koobiga shaahada CLIA ee Sheybaarka Gobolka ND, fadlan riix halkaan.

Haddii aad u baahantahay cadeynta "ka fasaxida gooniyeynta" ama "dokumintiga ka soo kabsiga" oo safarka, fadlan buuxi sahanka safarka.

Haddii aad u baahantahay cadeynta tallaalkaaga aad ku heshay ND, fadlan riix halkaan.

HA safrin haddii aad jirantahay ama haddii aad ka ak dhaweyd qof qaba COVID-19 14 kii maalmood ee la soo dhaafay. Majiro safar lagu ogolyahay duulimaad haddii baaritaanka lagaa helo oo aad ku jirtid muddada cirbidaada.

Miyaad hadeer ka safreysaa North Dakota?

Marka aad safreysid:

Xiro maaskaro si aad u illaalisid nafsadaada iyo dadka kale ee kaa ak dhow.

Ku dhaqan ka fogaanshaha bulshada markii ay suurtoagal tahay.

Dhaqo gacmahaaga inta badan.

Ka fogow taabashada indhahaaga, sankaa, iyo afka.

Hubi inaad la socotid waxa aad u baahantahay inaad soo celisid. Waaxda Caafimaadka North Dakota lama socoto dooqyada laga heli karo meeshaad usocotid si aad u buuxisid sharuudaha U.S., qaadaha, ama meeshaad usocotid ee kale.

Miyaad u safreysaa North Dakota?

FIIRO GAAR AH: Hubi inaad la socotid waxa aad u baahantahay inaad ku soo celisid Mareykanka. Waaxda Caafimaadka North Dakota lama socoto dooqyada laga heli karo meeshaad usocotid si aad u buuxisid sharuudaha U.S., qaadaha, ama meeshaad usocotid.

Ku soo laabashada North Dakota

Gobolka North Dakota waxay ku talineysaa raacitaanka hagida CDC:

Iska baartid baaritaanka fayraska 3-5 maalmood safarka kadib IYO guriga joogtid oo aad is karantiishid 7 maalmood buuxdo safarka kadib.

Xittaa haddii lagaa waayo, guriga joog oo is karantiil 7 maalmood buuxdo.

Haddii baaritaankaaga laga helo, gooniyey naftaada si aad uga illaalisid dadka kale inuu ku dhaco cudurka.

Haddii aadan isbaarin, guriga joog oo is karantiil 10 maalmood safarka kadib.

Ka fogow agagaarka dadka ugu jiro halista korodhay jirada daran oo 14 maalmood, haddii aad isbaartid ama aadan isbaarin.

Haddii baaritaankaaga laga helo ama aad qabtid aastaamaha COVID-19, ka gooniyey nafsadaada dadka kale oo raac tallooyinka Waaxda Caafimaadka North Dakota.

ND ma hayso tallooyin ama sharuudo dheeraad ah. Riix halkaan si aad u aragtid Amarada Xafiiska Caafimaadka Gobolka.



Safarka

Qadka caafimaadka dowlada COVID-19 waxaa laga heli karaa 866-207-2880, riix iqtiyaar 1, Isniinta-Jimcaha laga bilaabo 8:00am illaa 5:00pm, kaliya haddii ay tahay waqtiga xasaasiga ama haddii aan suurtoogleyn gudbinta foomka sahanka safarka.